


# Dembifal, meelkadhac/xadg udub ama dhaqan-xumo?

## Tallaabooyinkaan ayaa ka qaadi kartaa

**Qof kasta oo ka qaybqaata Dhaqdhaqaaqa Korpen [Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan] waa in uu soo-dhowayn iyo amni dareemaa.**

**Macnaha marna looma dulqaadan karo in goobaha dhaqdhaqaaqa Korpen ay falalka ku salaysan xoogsheegasho iyo takoorka ay ka dhacaan.**

**Hadaba maxaa la oggol yahay maxaana la oggolayn? Maxaana samayn kartaa haddii adiga ama qof aad taqaan fal xun loo geysto?**

# Tusmada


Xoogsheegasho 5

Faraxumayn jinsiga la xiriira 6

Horonimo 8

Cunsuriyada 9

Cabsida/Cuqdadada laqa qabo lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah/dadka aqoonsi-jinsiyeed kale leh { 10

Faahfaahinta xiriirka 11



# Xoogsheegasho

Macnaha Xoogsheegashada waxaa weeyaan in qof ama koox ay qof kale xoog u sheegtaan hal ama dhowr mar.

**Tusaalooyinka dhaqan-xumada:**

- In baraha internetka qof lagu xanto
- In baraha bulshada lagu qoro in qof uu fool xun yahay ama uu si xun u labisto.
- In si xun qof looga hadlo ama lays aflagaadeeyo
- In qof la cidleeyo ama layska dhegotiro jiritaankiisa
- In qof kaftan ahaan loo aflagadeeyo ama loola dhaqmo sidii qof doqon ah

Faleyaasha xoogsheegashada mararka qaarkood eedda way iska fogeyaan waxayna falalkooda ka dhigaan fal kaftan ku slaysan oo u baahan in loo dulqaato. Laakiin falka xoogsheegashada ku salaysan wuxuu dhibanaha dareen-siinayaa dhibsasho
tan kale haddii ay dhowr jeer dhacdo, xitaa haddii faleha aysan sidaas la ahayn.

Tusaalooyinka kor ku xusan lama oran karo waa dambifal waafaqsan sharciyada dalka Iswiidan u degsan, laakiin waa hab-dhaqan liid ku ah qodobada gundhigga heybadda ee u degsan Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan. Sidaas darteed, haddii aad la kulanto falalka noocaas fadlan sidii loo joojiyo falalka xoogsheegashada ku salaysan wargeli ururka aad ka tirsan tahay ama urur kale. Bogga ugu dambeeyo ka akhriso faahfaahinta xiriirka.

## Hab-dhaqamada faldambiyeedyada xiriir la leh

**Falalka xoogsheegashada ku salaysan waxaa lagu tiri karaan dembifal. Tusaalooyinka waa:**

- In qof la darbaaxo ama wax lagu dhufto
- In qof la hanjabo
- In baraha internetka in qof aan weli 15 sano buuxan lagu qasbo in u ku kaco falal jinsiga xiriir la leh
- In baraha internetka lagu faafiyo sawirada meelkadhaca ee qof kale
- In sawir ama muqaal laga qaado qof isagoo fasax laga qaadan ama ogayn, tusaale ahaan ku jira musqusha, qubeysanayo, ku sugan qolka dhar-beddelida.
- In qof la takooro, macnaha si xun loola dhaqmo sida tusaale jinsigiida ama diinta u aaminsan yahay darteed.

**Fal-dambiyada waa in booliska la wargeliyo.**

» Ha iloowin in marna aad khaladka lahayn haddii fal xoogsheegasho lagu geysto!



# Faraxumayn jinsiga la xiriira

Falalka faraxumaynta jinsiga la xiriira ee loo geysto qof aan raali ka ahayn waa sharci daro. Dhammaan falalka faraxumaynta jinsiga la xiriira lama oran karo, sida hadba sharciga waafaqsan waa sharcidaro, laakiin waa falal aan marna wanaagsanayn.

## Xad-sharciyada mugdiga ku jira

Xad-sharciyada mugdiga ku jira ee xiriirka la leh falalka faraxumayn jinsiga la xiriira, waa xaalado iyo xiriiryo aan ahayn sharcidaro, laakiin abuuri karaan dareenno aan la rabin ama noqon karaan kuwo khatar ah. Tusaale ahaan waxay noqon karaan xiriir-jinsiyeed oo ka dhexeeya qof hage ah iyo qofa adeegsade ah (halka da`da labaduba ay ka weyn tahay 15 sano). Falalka jinsiga xiriir la leh waxay kaloo ay ku lug yeelan karaan kaftan ama bogaadin

Xaaladaha kale waxay noqon karaan markii adeegsadeha u aad ugu baahan yahay taageero-bulshodeedka ee hagaha. Xaaladaha badidooda waxay noqon karaan wax fiican, laakiin waxay noqon kartaa hab faleha uu kalsoonida kaga raadsanayo adeegsadeha, taasoo ujedadeeda tahay in u ka faa'iidaysto jinsi ahaan (grooming, macnaha ka akhriso halka cinwaanka Dembifallada jinsiga ku qoran). Dhacdooyin fara badan oo xiriir la lahaa falalka faraxumayn jinsiga ayaa ka dhaceen laamaha isboortiga

sidaas ayay u dhaceen. Haddii hab joogto ah la yeesho wadahadal xiriir la leh gundhigga heybadda iyo isdhexgalka bulshadeed, hab fudud ayaa loo dhexmari karaa Xad-sharciyada mugdiga ku jira ee xiriirka la leh falalka faraxumayn jinsiga. Haddii ay jiraan fal oo aan sax kula ahayn, ugu sheekeey qof aad ku kalsoon tahay. Kadib si wadajir ah ayaa ugu arrinsan kartaan haddii dhacdada ay u baahan tahay in la wargeliyo ururka ama isbahaysiga, ama haddii arrinta lagu soo koobi karo in wadahadal loola yeesho faleha dhacdada.

## Falalka meelkadhaca jinsiga ku salaysan

**Tusaalooyinka falalka meelkadhaca jinsiga ku salaysan:**

- In qofka u si anshax-xumo ku fiiriyo, fooriyo ama yiraahdo ereyo xiriir la leh jinsiga
- In qof u faafiyo been-abuur ku saabsan jinsiga ama jirkaaga.

- In qof u ku taabto hab ku dareen-siiyo dareen aan fiicnayn.

- Qof ayaa wuxuu kugu yeeray magac-jinsiyeed kaasoo ujeedadiisa ahayd in u meelkagadhaco.

- Qof ayaa adigo raali ka ahayn iyo isagoo adeegsanayo baraha bulshada, e:mail, chat, sms ama siyaabo kale kugu soo diray fariimo, sawiro ama muuqaalo xiriir la leh arrimaha jinsiga iyo isutagga.

- Qof ayaa markii aad ku kulantaan baraha bulshada ama siyaaabo kale ku soo jeedinayo talo xiriir la leh arrimaha jinsiga iyo isutagga.

Sifadaha ugu muhiimsan ee lagu garto dhibaataynta, ayaa waxay yihiin in dhibbanaha usan raali ka ahayn falalka noocaas ah. Iyo dareenada iyo falcelinta dhibbanaha ayaa muhiim ah, fiirogaar lama siiyo ujeedada faleha u ka lahaa falkiisa.

Dhibaataynta jinsiga iyo isutagga xiriir la leh waxay mararka qaarkood noqon kartaa dembifal sharciga waafaqsan oo loo yaqaan *sexuellt ofredande*. Macnaha ereyo-sharciyeedyada waxaa weeyaan in faleha u qof u diro, tusaale ahaan, sawiro jinsi xambaarsan, u soo jeediyo talooyin jinsi/isutag xiriir la leh, u bandhigo xubanha taranka, taataabto ama siyaabo kale meel ugu dhaco heybad-jinsiyeedkaaga. Haddii ay dhacaan dhibaataynta jinsiga iyo isutagga xiriir la leh, waxaa hirgala qodobada sharciyeed *Sexualbrottslagstiftningen* [Xeerarka dambifallada xiriirka la leh jinsiga iyo isutagga], wuxuuna dhibbaneha dhacdada wargelin karaa booliska. Dhibbaneha wuxuu mar kasta la xiriiri karaa booliska oo u waydiin karaa qodobada sharciyeed ee isaga khuseeyaan dhacdada darteed.

Dhammaan falalka jinsiga iyo isutagga xiriir la leh waxay ka soo horjeedaan qodobada gundhigga heybadda u degsan Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan. Haddii adiga ama qof aad taqaanid fal noocaas loo geysto, wargeli ururka aad ka tirsan tahay, Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan ama urur kale sidii loo joojiyo falalka noocaas dartaada ama loogana hortago in qof kale aan loo geysan. Bogga ugu dambeeyo ka akhriso faahfaahinta xiriirka.

## Dambiyada xiriirka la leh jinsiga/isutagga

**Dambiyada xiriirka la leh jinsiga/isutagga**

- In qof u gacmahiisa, afkiisa ama xubnaha taranka ku taabto qof kale, iyadoo qofka kale usan raali ka ahayn

- In qof u qof kale ugu sheekeeyo falal xiriir la leh jinsiga/isutagga taasoo qofka kale dhibsado sheekada noocaas ah

- In qof lagu qasbo fal xiriir la leh jinsiga, sida tusaale galmo ama inuu qof ku siigeysto

In qof u qof kale isku dayo inuu sameeyo fal jinsiga xiriir la leh, tusaale ku hanjabo inuu faafiyo sawiro ama xanta qof ku saabsan

- In qof u qof kale ku qanciyo innuu daawado markii u samaynayo fal jinsiga xiriir la leh ama u qof kale samaynayo fal noocaas ah, sida bandhigidda xubinta taranka ama siigaysasho. Falka wuxuu ka dhici karaa baraha internetka ama goob ka baxsan.

- In fal jinsiyeed lagu sameeyo qof aan awoodin in u diido ama is difaaco. Tusaale ahaan lagu sameeyo qof jiifo, sakhraansan, ku markhaansan maandooriye, jiran ama itaaldarran taasoo u suurtagelin karin in uu is-difaaco.

- In sawir ama muqaal xiriir la leh jinsiga qof laga qaado taasoo qofku usan raali ka ahayn

- In laysku dayo in lacag, khamri haddiyad ama adeegyo kale lagu iibsado ama lagu beddesho jinsi/isutag ama sawirro jinsiga xiriir la leh

- In dhinaca jinsiga/isutaggga laga faa'iidaysto qof xaalad liidato ku sugan, faleha wuxuu noqon karaa qof macalin ah, tababare ama madaxa

- In qof da`diisa ka hooseeyso 15 sano loola yeesho fal jinsiga la xiriira waa sharcidaro iyadoo fiirogaar aan la siin haddii u raali ka ahaa iyo in kale

Macnaha falka loo yaqaanno *grooming* waxaa weeyaan fal xiriir loola yeesho qof aan 15 sano buuxsan, kadib sidii u qariyo faraxumaynta u ku dhaqaaqo in u xakameeyo ama jebiyo xadka qofka kana dhigo falalka uu da`yarka ula kacayo wax caadi ah. Falalka *grooming* waxay keenaan in dhibbanuhu uu dusha iska saaro mas'uuliyadda wixii dhacay, laakiin muddo dheer kadib soo xasuusto falalkii foosha xumaa ee loo geystay.

**Falal-dambiyeedyada ee jinsiga la xiriir waa in booliska la wargeliyaa.**

» Ha iloowin in marna aad khaladka lahayn haddii falal-dambiyeedyada ee jinsiga la xiriira, falalka meelkadhaca jinsiga ku salaysan ama *grooming* lagu geysto! Had iyo jeer dambifaleha ayaa eedda iskaleh. Faleha ayaa go'aansaday in u falka noocaas ku kaco iyadoo fiirogaar aan la siin nooca xiriirka idinka dhaxeeyo

# Horornimada

Falalka hörornimada ku salaysan waxaa ka mid ah dhammaan ficillada ka dhanka ah ee qof kale loo geysto sida dhaawac, xannuun sababa, cabsi geliya ama meel ugu dhaca sharafta qofka. Nooca falka wuxuu kaloo noqon karaa in qof lagu qasbo, in u sameeyo fal usan raali ka ahayn ama loo diido in u sameeyo fal u rabo in u sameeyo.

## Falalka jirka ama maanka loo geysto

Noocyada falalka jirka ama maanka loo geysto waxaa kamid ah in qofka loo geysto dhaawac-jireed, jirro ama xanuun ama qofka laga dhigo qof aan waxba qabsan karin ama ku sugan xaalad kale oo la mid ah.


Heerarka falalka jirka ama maanka loo geysto waa saddex oo kala duwan:

- Falalka jirka ama maanka loo geysto oo fudud waxaa kamid ah, tusaale ahaan dharbaaxo, haranti fudud ama riixid sababta dhaawac.
- Falalka jirka ama maanka loo geysto oo dhexdhexaad waxaa kamid ah tusaale ahaan in falka qofka loo geystay u sababo nabar, luq ka jabto ama ilig laga jebiyo, laakiin waxay xitaa noqon kartaa in qof timaha laga xiiro isagoo aan raali ka ahayn. In qof la geliyo xaalad gargaar la'aan ama xaalad kale oo la mid ah waxay noqon kartaa in qofka laga lumiyo xakamaynta jirkiisa sida tusaale maandooriye la siiyo.
- Falalka jirka ama maanka loo geysto ee aad u culus wuxuu noqon karaa mid halis naftiisa geliso sida in lagu weeraro mindi, faas ama hub.

Haddii falalka jirka ama maanka loo geysto u ahaa mid aan naxariis lahayn, waxaa xaaladdaas lagu tiriyaa falalka culus. Tusaale ahaan waxay noqon kartaa in jiifa la haraantiyo ama in dad badan ay wadajir u jirdilaan qof aan awoodin in u is-difaaco. Xataa faafinta cudurrada qaarkood, sida cudurka HIV waxaa lagu tiriyaa falalka jirka ama maanka loo geysto ee culus.

**Horornimada waa dembifal waa in booliiska la wargeliyo.**

» Ha iloowin in marna aad khaladka lahayn haddii fal hörornimo ku salaysan lagu geysto!



# Cunsuriyada

Cunsuriyada waxay ku salaysan tahay aaminsanaan in dadka ay leeyihiin haybado kala duwan hadba midabka maqaarka, midab-takoorka iyo/ama asalkooda/qowmiyadooda. Falalka cunsuriyada ku salaysan siyaabo kala duwan ayaa lagu muujiyaa, sida falalka loogu yeero cunsuriyadda maalinlaha ah ee ka kooban faallooyinka iyo ficillada ama horornimo cad iyo hab-dhis takoorid ku salaysan.

**Tusaalooyinka tibaaxaha cunsuriyada waxay noqon karaan:**

- su'aal sida "sideeda ba dalkee ka timid"
- filashooyinka ku xiran fikradaha qaldan, tusaale ahaan in la aaminsan yahay inaad si fiican u taqaano ciyaaraha kubbadda koleyga laakiin aadan waxba ka aqoon ciyaaraha barafka
- buuqa daanyeerka ama qolofta muuska oo garoonka lagu tuurayo
- in qof u timahaaga taabto maadaama u yahay "wax xiiso leh" ama" ka duwan kuwa kale
- kaftan ama faallooyin ku salaysan midabka maqaarka ama asalka

Kala soocida waa nooc ka mid ah cunsuryeeta, noocaan qofka bini-aadmi ahaan diiradda lama saaro, ee waxaa la saara waxa loo arko "kala duwanaan " - tusaale ahaan, timaha, midabka maqaarka, luqadda, dhaqanka ama asalka. Waxaa loo arki karaa yasid iyo meel ugu dhaca sharafta qofka, inkastoo eryada loo yiraahdo "sidii wax fiican ama amaanid". Ujeedada ugu muhimsan waxay tahay falcelinta. Cunsurinimada waxay kaloo lahaan kartaa qaab dhismeed, tusaale ahaan in dadka "aan lahayn magacyada iswidhishka" in si fudud loo siinin fursadaha waraysiyada shaqooyinka ama qaab dhismeed looga saaro fursadaha lagu helo awoodda, saamayn ku yeelashadaha iyo fursadaha kale. Gundhigga cunsurinimada waxaa weeyaan caadooyin taariikhi ah iyo bulsho xubnaheeda ay caddaan yihiin, kuwaasoo muddo dheer la siin jiray fursadaha dhaqaaleed, bulshodeed iyo siyaasadeed ee ugu wanaagsan – ha ahaadaan heer caalami iyo dalka Iswiidan ka dhacaan.
Falalka takoorka iyo horornimada ku salaysan waa dembifal waafaqsan sharciyada dalka Iswiidan u degsan. Xitaa falalka mararka qaarkood loo yaqaan "cunsuriyadda maalinlaha" waxay ka soo horjeedaan gundhigga heybadda u degsan Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan.



Haddii adiga ama qof aad taqaanid loo geysto falal noocaas ah – la xiriir kadib wargeli. La xiriir ururkaaga, Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan ama urur la mid ah. Marna keligaa dusha ha iska saarin. Bogga ugu dambeeyo ka akhriso faahfaahinta xiriirka.

## Dambiyada xiriirka la leh falalka nacaybka u sabab ah

Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay muujinta ra'yigiisa, laakiin goobaha isboortiga waxaa ka dhaqan galay gundhigga heybadda oo laga midaysan yahay. Sidaas darteed waa mamnuuc ereyada iyo falalka qaarkood.

**Sida tusaale waxaa loo arka dambifal:**

- faafinta hadallo meel-ka-dhac ah oo ku saabsan in dad qaarkood oo ka yimi dalalka qaarkood aynan isku haybad ahayn dadka intiisa kale
- xirashada dhar ama calaamado sida swastikas ama waxyaabo kale oo leh oo cunsuriyada lagu muujinayo oo meel-ka-dhac ah
- in qof shaqo ama hawl loo diido ama fursad kale taasoo u sabab ah sida tusaale midabka maqaarkiisa, asalkiisa ama magaciisa

Fal-dambiyada nacaybka xiriir la leh waa in booliska la wargeliyo

» **Xusuusnow: In isbahaysiga iyo ururka u xilsaaran yahay in taageero lagu siiyo haddii falalka lagu geystay ay ka dhaceen goobaha Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan.**

# Cabsida/Cuqdada da laqa qabo lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah/dadka aqoonsi-jinsiyeed kale leh

Cabsida/Cuqdadada laqa qabo lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah/dadka aqoonsi-jinsiyeed kale leh waa cadawnimo, nacayb ama takoor loo muujiyo dadka jinsiga kale ka hela. Macnaha waa markii bulshada ay aaminsan tahay in dhammaan dadka lagu tiriyo in ay ka helaan jinsiga kale, ay leedahay waa in isku aqoonsadaan jinsigii ay lahaayeen markii ay dhashteen, taasoo lagu tilmaami karin dad badan. Ka tirsanaansashada kooxaha jinsiyeed ee bulshada caadi la ah, badi ahaan waxay helaan mudnaan-siin. Qofka aan fursadahaas helikarin wuxuu la kulmi karaa inkiraadda jiritaankiisa, shakigeli shaqsiyeed ama falal meelkadhacyo ku salaysan.

**Macnaha Cabsida/Cuqdadada laqa qabo lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah/dadka aqoonsi-jinsiyeed kale leh:**

- u malayn in ay "khalad" tahay in laga tirsan yahay lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah
- aaminsan yahay in dadka ka tirsan lamaanayaasha isku-jinsiga ah/lamanayaasha isku iyo kala jinsiga ah aynan yeelan karin xuquuq la mid ah lamaanayaasha kala jinsiga ah
- kaftan yasid ku salaysan
- in laga saaro, in dhib ama dhaawac loo geysto taasoo u sabab ah dookhooda jinsiyeed

**Aragtida-bulshodeed oo ah in xiriirka lamaaneyaasha ee kala jinsiga ah u yahay wax dhaqangalay, waxay ka muuqataa nolol-maalmeedka, sida tusaale:**

- in naag la weydiiyo "ninkaaga muxuu sameeyaa?" halka sii dhexdhexaad su`aasha loo waydiin lahaa, sida lamaanehaaga muxuu sameeyaa?
- in loo qaato in qofka u leeyahay dano ama dabeecado gaar ah, sida tusaale laga filanaayo in uu ku wanaagsan yahay "Hab-casriyeedka labbiska"

Xitaa aragtida ku salaysan wax aan caadi ahayn way dhacdaa – waa markii aqoonsiga ama hab-dhaqanka qofka loola dhaqmayo sidii "wax" beddelka qof bulshada ka tirsan.. Sida hadba waafaqsan Xeerka arrimha takoorida, waa sharci-daro falalka xiriirka la leh takoorid, iyagoo lagu salaynayo aqoonsiga jinsigiisa ama muujinta jinsigiisa. Sidoo kale waa dambi culus - dembifal nacayb - sida tusaale in lamaanayaasha isku jinsiga ah, lamaaanayaasha isku-jinsi iyo kala jinsiga ah iyo dadka lama jinsiyoodka ah la handado, la dhibayo ama falal la mid ah loo geysto.

Laga soo bilaabo 2025 waxaa goobaha dhaqdhaqaaqa Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan waxaa ka hirgalay qodobo ku biirista dadka leh khibradda jinsiga lab iyo dheddig kala duwan oo aad halkaan ka heli karto.

Haddii adiga ama qof aad taqaanid fal noocaas loo geysto, wargeli ururka aad ka tirsan tahay, Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan ama urur kale. Bogga ugu dambeeyo ka akhriso faahfaahinta xiriirka.

Fal-dambiyada nacaybka xiriir la leh waa in booliska la wargeliyo

» **Xusuusnow: In isbahaysiga iyo ururka u xilsaaran yahay in taageero lagu siiyo haddii falalka lagu geystay ay ka dhaceen goobaha Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan.**

# Faahfaahinta xiriirka

Haddii adiga (ama qof aad taqaanid) loo geysto falal dhaqan-xumo, meel-ka-dhac ama fal-dembiyeed iyadoo lagu sugan yahay goobaha dhaqdhaqaaqa ururka, la xiriir maamulaha dhaqdhaqaaqa ama qof guddiga xubin ka ah

Haddii aadan ku kalsoonayn inaad la xiriirto qof ururka ka tirsan, waxaad toos ula xiriiri kartaa Xoghayaha Guud ee Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan. Faahfaahinta xiriirka waxaad ka heleysaa halkan.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaaRF-SISU Degmadaee kugu dhowwaxaa halkaas ka hawlgala xirfadyaqaanoyaal ku caawin kara.

Haddii aadan rabin in arrintaada aynan ururka ka tirsan tahay, Isbahaysiga ururrada jir-jimicsiga iyo isboortiga ee dalka Iswiidan ama RF-SISU ka arrinsadaan waxaad khadka taleefanka 08-6274010 kala xiriiri kartaa wakiilka arrimaha isboortigaidrottsombudsmannen@rf.seWa kiilka arrimaha isboortiga wuxuu tusaale ahaan ka caawini karaa sidii aad booliska arrinta u wargelin lahayd.

Haddii aadan rabin ama ka cabsanayso inaad toos ula xiriirto wakiilka arrimaha isboortiga, waxaad isticmaali kartaa adeegyada sirta ah oo qarsoon oona ku qufulan lambarro sir ah *visselblåsartjänsten*, kadib Wakiilka arrimaha isboortiga wuu ka war heli doonaa arrintaada..

Haddii adiga (ama qof aad taqaanid) loo geysto falal dhaqan-xumo, meel-ka-dhac ama fal-dembiyeed iyadoo lagu sugan yahay goobaha dhaqdhaqaaqa ururka, la xiriir xoghayaha guud. Faahfaahinta xiriirka waxaad ka heleysaa halkan.

Iyadoo fiirogaar aan la siinin xaaladda ama bay`adda lagugu gesytay falka, waxaad talo iyo taageero dartood la xiriiri kartaa ururrada magacyadooda hoos ku xusan:

**Xoogsheegasho** BRIS| Friends

**Faraxumayn jinsiga la xiriira** BRIS| Brottsofferjouren| Koll på soc| Storasyster| Freezonen| Novahuset| ECPAT

**Cunsuriyada** Brottsofferjouren| BRIS

**Homo-/bi-/transfobi** RFSL soo dhaweynta taageerada

**Falalka horonimada ee haweenka ka dhanka ah**Unizone|Kvinnofridslinjen | ROKS

**Falalka horornimada ee sharafta la xiriira** RiksorganisationenGAPF| Linnamottagningen

Warbixin faahfaahsan oo ku saabsan ururrada taageero dheeraad laga heli karto waxaad ka akhrisan kartaa UMOiyo Näthatshjälpen

Korpen Svenska Motionsidrottsförbundet
Skansbrogatan 7, Box 11016, 100 61 Stockholm, info@korpen.se, korpen.se